

Oktoobar 7, 2020

Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Boston:

Intii aan ku guda jirnay qorshaynta deyrta, Duqa Magaalada Walsh iyo aniga waxaan si adag ugu taaganahay go'aan qaadashada ku saleysan sayniska iyo xogta isla markaana ilaalinaysa caafimaadka, nabadgelyada, iyo ladnaanta ardayda, qoysaska, macalimiinta, shaqaalaha, iyo dhamaanba bulshada xarunta.

Nabadgelyada, marxalada mas'uuliyada ee qaabka isku-dhafan ayaa loo sameeyay si loogu oggolaado BPS iyo madaxda caafimaadka dadweynaha awood ay ku dabagalaan xogta, raacaan isbeddellada, kuna sii wadaan ama u joojiyaan qorshaha si waafaqsan. Warbixin la soo saaray subaxnimadii maanta, waxaan ku helnay xog cusub oo caafimaadka bulshada ah taasoo nagu kaliftay inaan hakino qorshaheenna hadda.

Duqa Magaalada ayaa shaaca ka qaaday in magaalada-weyn heerka toddobada maalmood ee Hergebka-dabeysha heerka waxtarka uu kordhay ilaa 4.1%. Tiradaasi waxay waxyar ka sarreysaa 4% marinkii ay ku taliyeen saraakiisha caafimaadka bulshada heshiiskeenna aan la galnay Midowga Macallimiinta Boston inay calaamad u tahay dib ugu laabashada barashada fog. Iyadoo taas laga duulayo, waxaan go'aansanay inaan dib u dhigno wajiga xiga ee ku soo noqoshada nabdoon ee iskuullada, oo markii hore loo qorsheeyay inay bilaabato ugu dambeyn bisha Oktoobar 15. Waxaan dib u eegi doonaa dhammaan xogta usbuuca soo socda waxaan sameyn doonaa go'aanno dheeri ah oo ku saleysan waxa aan baranno.

BPS weli way ka go'an tahay inay ixtiraamaan xulashada qoyska iyo inay mudnaan siiyaan ardaydeena baahida ugu sarreeysa ee xagga waxbarashada shakhsi ahaaneed. Ka dib markaan la tashaday DESE, saraakiisha caafimaadka bulshada ee magaalada iyo gobolka, iyo marka la fiiriyo tirada xadidan ee ardayda hadda ku jirta dugsiyada, dhammaan ardayda ku soo laabtay dhismayaasha dugsiyada BPS usbuucii la soo dhaafay, ama horay loogu aqoonsaday inay yihiin baahiyo sare oo xaq u leh ku noqoshada dhismayaasha dugsigiisa, waxay sii wadi doontaa ikhtiyaarka ay ku baran karto shaqsi ahaan iyo helitaanka tilmaamaha iyo taageerada macallimiintooda. Sida had iyo jeerba, qoysasku waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay carruurtooda ku sii hayaan gurigooda si ay ugala qeyb qaataan barashada fog ee fasalkooda.

Tani waxay ahayd waqti aad ugu adag dhamaanteen. Waan ogeyn galida sanad dugsiyeedkaan inaan ubaahanahay inaan la jaanqaado qorshaheenna. Hadafkeenu wuxuu ahaa inaan fursado u abuurno barashada shaqsi ahaaneed iyo adeegyada ay ardayda iyo qoysasku

codsadeen oo aan ognahay inay arday badani u baahan yihiin si ay ugu kobcaan bulsho ahaan iyo tacliin ahaan - qaab iyaga iyo shaqaalaheenna u nabdoon. BPS waxay sii wadayaan inay dib u eegaan cabbirada caafimaadka bulshada, isbeddellada, iyo hagidda, waxayna ku siin doonaan wixii warbixin ah ee qorshayaasheena sida ugu dhakhsaha badan markay horumariyaan.

Waad ku mahadsantahay sharafkaaga, dulqaadkaaga iyo dabacsanaantaada. Waxaan weli u heellan nahay inaan ardaydeena siino waxbarasho heer sare ah oo loo siman yahay, oo ahmiyadeena koowaad ah caafimaadkooda iyo nabadgelyadooda.

Nabadgelyo ku joog iyo caafimaad.



Dr. Brenda Cassellius
Kormeeraha guud

Magaalada Boston waxay kordhisay dadaalka baaritaanka iyo gaarsiinta xaafadaha ay saameysay. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Hergebka-dabeysha, ay kamid tahay baraha baaritaanka iyo ilaha bulshada, ayaa laga heli karaa [boston.gov/coronavirus](https://www.boston.gov/coronavirus). Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dib u furista dayrta, ilaha tiknoolajiyada iyo goobaha cunnada ee bilaashka ah, booqo [bostonpublicschools.org/reopening](https://www.bostonpublicschools.org/reopening).